

## ABABINTA TOOSAN

—

**Talo kugu hagaysa barbaarinta san ee ilmaha**

*(Helpful guidance for effective child rearing)*

—————

**CABDIQANI XASAN MUXUMED (Aw-Cabdiqani)**

—————

**Sawirka Galka**

**Faa'iso Daahir Jeyte iyo Nimco Daahir Jeyte**

### **XIRIIR**

Dalabka buuggan ama wixii talo & toosin ah kala xiriir

[gababdigani@gmail.com](mailto:gababdigani@gmail.com)

[xagallaf@gmail.com](mailto:xagallaf@gmail.com)

*©Xuquuqda buuggan waxaa leh qoraaga. Isaga oo idil ama qaybo ka mid ah lama daabacan karo, illaa oggolaansho qoran laga helo qoraaga.*

## ARAGTIDA GUUD EE TARBIYADA

“Qoon hoggaan xun iyo qoys hooyo xun midkoodna ma hana-qaado” – *Cali Axmad Raabi (Seenyo)*.

“Carruuri waa sida beer oo ninba si ayey ugu baxdaa”. – *Cali Axmad Raabbi (Seenyo)*.

“Laba-lugood hooyadiisaa la meraa (xulaa) afar-lugoodna aabbihis” – *Murti Soomaaliyeed*.

Barbaarintu waa shayga oo si aayar aayar ah loo gaarsiiyo heerkiisa, waana ka ballaaran tahay korinta. Quraanka kariimka ah Allaah **swt** waxa uu, ku xusay erayga "rabbayaanii". Sidaas oo kale waa kii Fircoon ku lahaa N. Muuse sc "miyaanan ku barbaarin". Ma uusan dhihin miyaanan ku korin.

Waxaa mudan in aan is weydiinno sababta iyo hadafka tarbiyada laga leeyahay. Marka aan dooneyno in aan arrin fahamno si dhammeystiran waa in aan cilmi u yeelanno miisaanka arrinku leeyahay iyo weliba xukunkiisa.

In la tarbiyeeyo carruurta waa xil saaran waalidiinta. Haddii ay gutaan xilkaasna Alle wuu ka abaal marinayaa, haddii ay dayacaanna iyadana waa la weydiin doonaa maalinta qiyaamaha. Marka ilmaha si wanaagsan loo barbaariyo waxa ay noqdaan sadaqo jaariya ah iyo ajar kuu soconaya geeridaada dabadeed. Faa'iidooyinka

tarbiyada waxaa iyana laga helaa in bulshadu hagaagto oo la helo ummad qiimo leh.

Waalid kasta wuxuu ku dadaalaa inuu carruurtiisa u gudbiyo afar arrimood:

- Diintiisa; in ay ka dhaxlaan carruurtiisu diinta iyo caqiidada.
- Dhaqankiisa; in ay ka dhaxlaan carruurtiisu dhaqankiisa.
- Afkiisa; in ay carruurtiisu ka dhaxlaan afkiisa hooyo.
- Caadadiisa; in ay carruurtiisu ka dhaxlaan caadooyinkiisa iyo taqaaliiddiisa.

Arrimahaas afarta ah oo kor ku xusan si loo gaaro waxa ay u baahan tahay in si wanaagsan loo fahmo jidka iyo siyaabaha lagu gaari karo. Marka aad weydiiso waalidiin badan, ka warran carruurta. Waxa ay kuugu jawaabayaan, guri wanaagsan ayaan u dhisay, raashin wanaagsan baan siiyaa, dhar qaali ah ayaan u soo iibiyaa, aad bey u wanaagsan yihiin, waxba kama maqna iwm. Tarbiyadii waxa ay noqotay cunto, cabitaan, dhar iyo guri qurxoon. Laakiin arrimahaas goormee noqdeen tarbiyo? Carruur aan laga war-heyn habdhaqankooda, lala socon ficilladooda iyo hadalkooda aan la barin sidii ay ku gaari lahaayeen adduunkooda iyo aakhiradooda toona, in la yiraahdo way wanaagsan yihiin waa fahandarro iyo xilkasnimo la'aan.

Waxaa jira toban arrimood oo lagama maar-maan ah si loo tarbiyeeyo carruurta. Waxa ayna kala yihiin: